



Salaada lagu tukado masjidkaygan waxay ka khayr badan tahay kun salaadood oo lagu tukaday masaajida kale ee isaga kasoo haray marka laga reebo masjidka xaramka

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee wuxuu ka wariyey Nabiga scw inuu yiri: "Salaada lagu tukado masjidkaygan waxay ka khayr badan tahay kun salaadood oo lagu tukaday masaajida kale ee isaga kasoo haray marka laga reebo masjidka xaramka".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey fadliga ay leedahay salaada lagu tukado masjidkiisa, iyo inay ka fadli badan tahay kun salaadood oo masaajida kale ee dhulka, ee aan ahayn masjidka xaramka Makkah, waayo masaajidka xaramka Makkah salaada lagu tukadaa way ka fadli badan tahay tan lagu tukado masjidka Nabiga scw.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65090>

